

A World of Opportunities

Vote

NOVEMBER 6, 2018

Saint Paul PUBLIC SCHOOLS

Our Kids. Our Community. Our Future.

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxaa soo food-saartay dakhliga ka imanaya dawladda oo yaraaday, qiimaha waxbarashada oo kor u kacay iyo miisaaniyadda oo la yareeyay. Si arrintan wax looga qabto, Guddoonka waxbarashada ee SPPS ayaa dhammaantod isku raacay in cod-bixiyeyaasha iskuullada dhaqaale-kordhin loo weydiyo bisha Nofeembar, 6'deeda 2018 oo ah maalinta doorashadu dhacayso.

Taxaddiga/Hawsha

Si aan ula soconno xawliga waxbarashada carruurteenna islamarkaana ugu helno dhaqaale ku filan

Su'aalaha Cod-bixinta

Tix-galinta in la kordhiyo canshuurta sii SPPS ay ugu suurto gasho in la maal-galiyo iskuullada lagana dhawrsado in la jaro miisaaniyad kale


Maxaa Keenay In Xilligan La soo Jeediyo Canshuurta?

- SPPS waxay jartay miisaaniyad dhan \$50 malyuun saddexdii sano ee la soo dhaafay waxaana la ansixiyay in la jaro \$17.2 malyuun sanad-dugsiyeedka 2018-19.
- Dakhliga laga helo dawladda federaalka ah iyo tan gobolka lama jaan-qaadayaan sicer bararka iyoo baahida waxbaerasho ee ardayda.
- Adeegyada waxbarashada gaarka ah ee loo baahanyahay waxay Degmada ugu kacaan \$42 malyuun oo ah kharash ka badan inta ay sanadkii helaan, arrintan oo cadaadis dheeraad ah sii saaraysa miisaaniyadda guud ee lagu shaqeeyo.

Maxay tahay Canshuurtan lagu Shaqeynayo?

Canshuurtan la soo jeedinayo waxaa lagu maal-galinayaa hawlaha fasalka, wax-baraidda iyo kharashaadka kale ee fasalka.

Maalgelinta Waxbarashada Guud ee Arday Walba



Haddii maalgelinta gobolku la jaan-qaadi lahayd sicer bararka laga soo billaabo 2003, SPPS waxay heli lahaayeen ku dhowaad \$620 oo dheeraad ah calaa arday, ama wadar ahaan \$21.6 milyan oo dheeraad ah sanadkan.


Xigasho: Waaxda Waxbarashada ee Minnesota iyo Ururka Dugsiyada Magaalooyinka waaweyn Juun 2018 qiyaasaha sicer bararka

Iskuullada dadweynaha oo xooggani waxay si toos ah xiriir ulal leeyihiin wanaagga bulshadeena iyo qiimaha guryaheenna iyo handtideena.

Macluumaadka Dhabta ah ee Canshuurta

Codsigani wuxuu miisaaniyadda degmada ku kordhinayaa \$475 calaa arday, iyadoo ay ka dhigantahay in degmadu heli doonto \$18.6 milyuun sanad walba 10-ka sano ee soo socota. Qiyaasta saamaynta ay canshuurtu ku yeelanayso guri walba (guryaha qiimahooda yahay qiyaastii \$175,000) waxay noqonaysaa \$11 bil walba.

Canshuurta Hawlgalka ee Codbixiyayaashu Oggolaadeen, 2018-19



SPPS waa degmada labaad ee ugu weyn iskuullada gobolka Minnesota, haddana waa degmada ugu hoosaysa marka la yiraahdo dhinaca oggolaanshaha codbixiyayaasha ee canshuurta marka la barbar dhigo tobanka degmo ee ugu weyn gobolka iyo kuwa deriska la ah SPPS. Lacagahan waxay bixiyaan kharashka muhiimka ah ee fasalada, barista iyo kharashyada kale ee hawlgalka.

Haddii ay cod-bixiyayaashu oggolaadaan codsigan,

Dhaqaalahani wuxuu inaga caawinayaa:

- In lagu maal-galiyo iskuullada iyo ardayda fasalladoo dhan
- In lagu hirgaliyo Qorshaha Istiraatiijiyadda ee Degada si loo kordhiyo guulaha waxbarashada ee dhamaan ardayda
- In la kordhiyo adeegyada caafimaadka ee dhimirka iyo bulshada si loo taageero ardayda
- In la sameeyo dugsi dhexe oo loo qorsheeyay inuu daboolo baahida waxbarasho iyo tan korriinka maskaxda ee ardayda islamarkaana uu u diyaariyo inay galaan dugsi sare iyo meelo ka sarreeya
- In laga dhawrsado in la sii jaro miisaaniyad kale

Haddii ay cod-bixiyayaashu oggolaan waayaan codsigan,

waxaa SPPS soo food-saaraysa in miisaaniyadda laga jaro malaayiin-dollar, arrintan oo keenaysa in:

- La jaro barnaamijyada lagu caawiyo ardayda ku rafaadsan waxbarashada
- La yareeyo barnaamijyada iyo shaqaalaha iskuullada oo dhan
- La yareeyo tirada shaqaalaha kalkaaliyayaasha ah, karraaniyada, shaqaalaha nadafadda, shaqaalaha maamulka, iyo shaqaalaha kale ee degmada
- Saamayn uu ku yeesho hirgalinta Qorshaha Istiraatiijiyadda ee Degada ee ay bulshadu taageersantahay

Qorshaha Istiraatiijiyadda SPPS ee natijada ee ardayda xilliga fog:

- Yaraynta farqiga guulaha waxbarasho ee u dhexeeya ardayda ee ku salaysan midabka, qawmiyadda, iyo dhaqanka
- Kordhinta guulaha waxbarasho ee ardayda barata luqada Ingiriiska (English Learners)
- Kordhinta guulaha waxbarasho ee ardayda hela adeegyada waxbarashada gaarka ah
- Wanaajinta diyaar-garowga ardayda ka hor intaysan galin fasalka kindergarten
- Kordhinta guulaha waxbarasho ee akhriska iyo xisaabta ee ardayda oo dhan
- U'diyaarinta dhammaan ardayda qalinjabisa inay gaalaan jaamaco iyo shaqooyin



Xisaabtanka Dhinaca Maaliyadda

SPPS waxay u isticmaashaa dakhliga ka yimaada canshuur-bixiyayaasha si masuuliyadaysan waxayna ku dadaalaan inay beekhaamiyaan si loogu dadaalo waxbarashada ilmaheena. Degmadu:

- Waxay canshuur-bixiyayaasha u kaydisay in ka badan \$9 milyuun oo ka dhalan lahayd dul-saarka muddada dheer iyadoo arrintan lagaga badbaaday in dib loo maal-galiyay damaaneedkii degmada saddexdii sano ee la soo dhaafay
- Waxay heshay abaal-marinta sanadlaha ee ay bixiso Waaxda Waxbarashada ee Minnesota oo lagu guddoonsiiyay soo gudbinta muuddaysan ee warbixinta saxda ah oo maaliyadeed
- Waxay leedahay damaanaad ku jira boqolkiiba 15-ka ugu sarreeya degmooyinka iskuullada Minnesota, arrintan oo canshuur-bixiyayaasha lacag u kaydinaysa
- Waa degmada labaad ee ugu weyn iskuullada gobolka, laakiin degmadu waxay ku kharash-garaysaa maamulka wax ka yar inta caadiga iyo wax ka badan inta caadiga ee kharashaadka fasallada iyo wax-baraidda ee miisaaniyada

Wax badan ogow: Booqo spps.org/referendum2018 • Wac 651-767-8157 • Email u dir referendum@spps.org

Waxaa diyaariyay o maal-galiyay Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul. Daabacaaddani wakii kama aha musharaxiinta u tartameysa doorashada iyo waliba su'aalaha doorashada.